

Su'aalaha inta badan la isweydiyo ee xaq-u-yeelashada Apple Health ee ku saabsan cudurka korona ee COVID-19

1. Miyaan halis ugu jiraa in aan lumiyo Apple Health (Medicaid) inta uu socdo cudurka COVID-19 ee ku faafay adduunka oo dhan?

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) iyo hawladeennadiisa ayaa iska-dhaafi doona in ay joojiyaan caynsanaanta dhammaan qaatayaasha Apple Health haddii shakhsiga:

- Uu codsado joojinta mooyee;
- Uusan degganayn gobolka Washington mooyee; ama
- Uu dhintay mooyee

2. Waxaan helay warqad sheegaysa in caynsanaanteyda la xiray oo aan la cusboonaysiin. Sideen mar kale u hawlgelin karaa caynsanaanteyda?

Haddii caynsanaantaada daryeelka caafimaad loo xiray sabab dib-u-cusboonaysiin la'aan, shaqaalaha xaq-u-yeelashada HCA ayaa dib u soo celinaya. Waxaad heli doontaa warqad arrintan lagu xaqiijinayo. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama caynsanaantaada aanan weli la soo celin, wac 1-800-562-3022.

3. Miyaan weli u baahanahay in aan bixiyo xaqiijinta codsigeyga caynsanaanta ee taariikh hore dhaqan galay?

Haddii aadan awoodin in aad soo dirto caddaynta dakhliga iyadoo ay sababtuna tahay cudurka korona ee COVID-19, HCA wuxuu aqbali doonaa in aad adiga laf-ahaantaada xaqiijiso dakhliga ee loogu talagalay xaq-u-yeelashada caynsanaanta taariikh hore dhaqan gashay laga soo bilaabo Febraayo 2020 iyo bil kasta ee uu saameeyay cudurka korona ee COVID-19.

4. Miyaan codsan karaa muddo kordhinta macluumaadka ay iga sugayaan HCA ama Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS)?

Haa. Waxaannu bixinaynaa 30 maalmood oo dheeraad ah si loo bixiyo macluumaadka la codsaday. Waxaad kala xiriiri kartaa HCA lambarkan 1-800-562-3022 ama DSHS lambarkan 1-877-501-2233.

5. Weli miyaa loo baahan yahay ka-warbixinta isbeddelka?

Haa. Haddii aadan helin dakhli ama aad iska beddeshay dakhli laga heli shaqo ilaa shaqo la'aan, waxaad u baahan tahay in aad ka soo warbixiso isbeddelka adiga oo cusboonaysiinaya arjigaaga.

6. Waxaan hadda la joogo helayaa caynsanaanta Apple Health waxaanna hadda leeyahay uur. Ma u baahannay in aan uurkeyga ka warbixiyo?

Haa. Waa in aad soo sheegtaa uurkaaga.

7. Waxaan helayaa caynsanaanta Apple Health; ma u baahanahay in aan soo sheego dakhligeyga shaqo la'aanta ama dheefta shaqo la'aanta toddobaadlaha ee dheeraadka ah?

- Ku saley dheefta toddobaadlaha qaddarka dakhliga shaqo la'aanta: Haa, waa in aad soo sheegtaa dakhligan
- Dheefta toddobaadlaha ee dheeraadka ah qaddarka: Maya, ha soo sheegin dheefta shaqo la'aanta dheeraadka ah ee toddobaadlaha

8. Waxaan helay jeegga saameynta dhaqaalaha ee dowladda federaalka. Ma u baahanahay in aan soo sheego dakhligan?

Maya, ha u sheegin jeegaagga saameynta dhaqaale Washington Healthplanfinder. Dakhliga saameynta dhaqaale looma xisaabinayo Apple Health.

9. Lacag-bixinnada Amaahda Canshuurta Carruurta ee La Horumarsaday ayaa bilaabanaya 15-ka Luulyo, 2021. Ma u baahannahay in aan soo sheego dakhligan?

Maya, ha u soo sheegin lacag-bixinnadaada bilaha ee Amaahda Canshuurta Carruurta ee La Horumariyay Washington Healthplanfinder. Lacag-bixinnadan looma xisaabi karo Apple Health.

10. Annigu ma ihi qof deggan gobolka Washington, balse halkan ayaan u soo safray haddana waan xannuunsanahay waxaanna ku jiraa karantiil. Miyaan codsan karaa Apple Health ee loogu talagalay baaritaanka iyo/ama daaweynta cudurka COVID-19?

Haddii lagugu karantiilay Gobolka Washington, waxaad xaq u yeelan kartaa caynsanaanta iyo daaweynta cudurka koronaha ee COVID-19. Fadlan ka soo wac HCA lambarkan 1-800-562-3022 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

11. Waxaan helaa caynsanaan loo marayo DSHS caadi ahaanna waxaan u baahannahay in aan bixiyo caddayn dakhli ama bayaannada bankiga. Miyaa weli la igaaga baahan yahay in aan macluumaadkan warqad ku bixiyo?

Maya, balse waxaad adiga laf-ahaantaada xaqiijin kartaa dakhliga iyo kheyraadka marka aad codsanayso, dib u cusboonaysiinayso ama aad isbeddelka soo sheegayso. Waxaad DSHS ka wici kartaa 1-877-501-2233 si aad ugu sheegto macluumaadkaaga.

12. Waxaa cudurka COVID-19 la igaaga baaray goob gaadiidka maraan waxaanna codsaday caynsanaanta Caafimaadka Xaaladaha Degdegga ah ee Shisheeyaha (AEM). Waa maxay dokumentiyada aan u baahanahay in aan gudbiyo?

Goob baaritaan kasta waxaa ay bixisaa dokumentiyo kala duwan. Bixi warqado shaqo kasta ee aad heshay oo muujinaya in lagaa baaray cudurka COVID-19. Waxaa kaloo u baahan doontaa in aad bixiso shax kasta iyo/ama qoraallada daaweynta. Dokumenti kasta ee aad ka hesho bixiyahaaga ee caddaynta u ah baaritaankaaga waa la aqbali doonaa.